

**Xeerka Golaha Sare ee Kacaanka lamba. 15 ee 1 Nofeember 1969.**

**Dhismaha laba Guddi oo qaabilsan ururinta Canshuuraadka**

**MADAXWEYNAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA**

Kadib markii la arkay Axdiga Kowaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969 oo awoodda sharci dejinta, garsoorka iyo fulinta siinaya Golaha Sare ee Kacaanka;

Kadib markii la garoowsada baahidda deg-degta ah loo qabo dhismaha in laga gunaa ro muranka tirad badan oo ag yaala hey'adaha garsoorka ee la xiriira canshuuraadka si loo xoojiyo hirgelinta sharciga iyo soo uruurinta canshuuraadka waxaa la dhisay 2 Guddi oo degdeg ah ee qaabilsan go'aaminta canshuurta;

Kadib markii la arkay warbixinta Guddiga Canshuuradka oo lagu dhisay amarka Golaha Sare ee Kacaanka ee 23 Oktoobe 1969;

Kadib markii la dhegestay talada Golaha Sare ee Kacaanka.

**WAXAA LA SOO SAARAY**

**Qod. 1  
Dhismaha**

Waxaa la dhisay 2 Guddi ee Canshuuraadka qaabilsan oo degdeg ah si qaab degdeg ah loo go'aamiyo murranada arrimaha canshuurta oo ag yaala Hey'adaha Garsoorka ee Dowladda Dimuqratiga Somaliya iyo kuwa kuwa kale oo ay soo jeediyaa Maxkamadaha Gobollada Muqdisho iyo Hargeysa oo awood sharci u leh qeybaha Gobollada Konfureed iyo kuwa Waqooyiga.

**Qod. 2**

**Qaabka Dhismaha**

Guddiyadu waxaay ka koobnaan doonan:

Hal Garsoore ee Maxkamadda ama Sareeyo	Guddomiye
Hal Sarkaal ee Ciddanka Xoogga Dalka	Xubin
Hal Sarkaal ee Ciidanka Booliska Qaranka	Xubin
Hal Sarkaal ee Ciidanka Booliska Canshuurta	Xubin
Hal sarkaal oo Wasaaradda Maaliyadda metela	Xubin
Hal sarkaal oo Xisabaadka Guud metela	Xubin
Hal canshur-bixiye oo Rugta Ganacsiga ka socda	Xubin
Hal Khabiir canshuuraha oo la taliye ah	Xubin

Oo aan lahayn awoodda codeynnta Guddiga Muqdisho dhexdisa laakin leh awooda la bixinta su'aaladda ay Guddigu weydiiso.

Magacyada shaqsyaadka loogu tala galay Maamulka waxaa si dhaqsi loogu soo gudbin doona Guddoiyeeyalk Guddiyada.

**Qod. 3  
Awoodaha**

Guddiyada Canshuuradka ee deg-deg ah waxay leeyihin awoodaha lagu carifay qod. 60 iyo 73 ee Qorista Keliga ah ee Canshuurta Toosan eek u carifan

Dekreta-Sharci lamba. 5 ee 6 Nofember 1966 oo u leh awood qaadista dacwooyinka darajada 2aad iyomidda Maxkamadda Sare.

Go'aanadda Guddiga Deg-degta ah waa mid rasmi ah oo aan racfaan lahayn

**Qod. 4**  
**Howlaha Guddiyada**

Galalka dacwadaha canshuuraadka waxaa laga soo gudbin dooona hey'adaha garsoorka ilaa iyo Guddomiyeyaasha qaabilسان sida ugu dhaqsi badan iyado lagu soo lifaqay wixii qorollo ee la socday.

Galalka cusub, dacwooyinka iwm waxaa si toos loogu soo diri doonaa Xafiiska Canshuuraadka oo qaabilسان kuwaaso muddo 30 beri gudahooda loo diri doono Guddomiyeyaalka qaabilسان.

Guddomiyaha wuxuu hoggaiminaya kullan, wuxuu ka magacaabi doona xubnaha dhexdooda Xoghaye,wuxuu siin doonaa qorallada si loo gaaro wada shaqeey wacan ee Guddiga, haddii Guddomiyuhu maqan yahay waxaa bedeli doono xuban laga soo dhix doortay xubnaha.

Howl galka Guddiyada waxaa ka qeyb qaadan doono Xafiisyada iyo shaqaalah Maxkamada Gobollada iyo Rafcaan oo u qalma.

**Qod. 5**  
**Go'aannada**

Go'aanadda Golaha Canshuurta Deg-degta ah waxaa lagu gaari doona tirada ugu badan, waxayna yihiin kuwa rasmi markii kala barka xubnaha ay ka soo qeyb galeen.

“Go'aanada’ waxaa lagu wargelin doona canshuur bixiyaha waxaa nuqlu loo gudbin doona Xafiisa Canshuurta ee qaabilسان.

Haddii canshuur bixiyuhu uu bixin waayo muddo 15 beri gudahooda lacagta lagu go'aamiyey waxaa qassab looga dhigi doona fulinta go'aan laga qaatay si loo hirgeliyo Sharcigaan.

**Qod. 6**  
**Hirgelinta Sharciga**

Sharcigaan wuxuu hirgeli doona maalinta ku xigta kadib markii lagu soo faafiyey Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 1 Nofember 1969.

Madaxweynaha  
Golaha Sare ee Kacaanka  
**Sareeye Guuto Mohamed Siyad Barre**